

BILAABIDA JIDKA 345, JID KU CUSUB KOONFUR BARIDA METRO!



Metro Transit waxay ku faantaa inay bilawdo Jidka 345, oo isku xidhaya magaalooyinka Woodbury, Newport, West St. Paul, Minneapolis/St. Paul International Airport, iyo Bloomington si ay u bixiyaan adeeg gaadiid oo dheereeya oo la isku halayn karo gudaha koonfur-barida Metro laga bilaabo Diseembar 6, 2025.

Guudmarka adeega

Jidka 345 waxa uu yareynayaa wakhtiga la iskugu safro Woodbury iyo Mall of America lagu yar hakanayo ku dhawaad 30 daqiiqo iyada oo la siinayo macaamiisha xidhiidhyo toos ah meelaha muhiimka ah oo ay ku jiraan:

- Boosteejada Woodlane oo ku taalo Woodbury (Jidadka 323, 355, Leenka Dahabiga ee METRO, Metro micro - Woodbury)
- Boosteejada Gaadiidka ee Newport
- Robert St. & Marie Ave. oo ku yaalo West St. Paul (Jidka 68)
- Agagaarka Livingston Ave. oo ku yaalo West St. Paul (Route 75)
- Minneapolis-St. Paul International Airport (Jidadka 54, 495, 686, Leenka Buluuga ee METRO)
- Boosteejada American Blvd. oo ku taalo Bloomington (Jidka 54, Leenka Buluuga ee METRO)
- Jidka 54 oo mara joogsiyo bas oo badan oo ku yaalo Bloomington
- Boosteejada Gaadiidka ee Mall of America oo ku taalo Bloomington (Jidadka 54, 442, 444, 495, 515, 538, 539, 540, 542, 686, Leemanka D, Buluuga, iyo Casaanka ee METRO)



Jidka 345 waxa kale oo uu isku xidhaa dhawr waddo oo kale - oo ay ku jiraan: 54, 68, 75, 323, 355, 442, 444, 495, 515, 538, 539, 540, 542, 686, iyo Metro micro – Woodbury, Leenka METRO D, Buluuga, Dahabiga, and Casaanka.

Adeegga baska isticmaala 345 waxa la heli doonaa todobada maalmood ee usbuuca laga bilaabo 6 a.m. - 8 p.m. waxayna socon doontaa 60-kii daqiiqoba mar, iyadoona ay ku jiraan maalmaha fasaxyada.



**Ma xiisaynaysaa inaad wax badan ka ogaato
mashruucan?**

Waxaan jeclaan lahayn inaan fikirkaaga maqalno!

Julie Martinez, Iskuduwaha Wacyigelinta Bulshada

Julie.Martinez@metrotransit.org